

Waa maxay caafimaadka maskaxda?

Caafimaadka maskaxda waxaa loola jeedaa si guud sida ay u shaqeyso maskaxda. Ogaanshaha waxyabaha khatarta ah iyo waxyabaha caafimaadka ah ee saameeya shaqada maskaxda iyo sida fiican ee loo qorsheeyo nolosha oo dhan caafimaadka maskaxda waa wax ku caawinaya in ay dadku si wacan u noolaadaan markay gaboobaan.

Waa maxay ilowshaha?

Ilowshaha waa hoos u dhac ku yimaada shaqada maskaxda, sida fakaridda, xusuusta, iyo caqliga, oo waxay saameysaa nololmaalmeedka qofka iyo hawlihiisa.

Sababaha ilowshaha waa kuwa la celin karo, sidaas awgeed waxaa muhiim ah in la iska baaro xusuusta ama in lagala hadlo dhakhtarkaaga.

Goorma ayaa dadka lagula taliyaa baarista xusuusta?

- Haddii aad rabto in aad adigu muddo dheer la socoto xusuustaada
- Haddii aad adiga, qoyska, asxaabta, ama dadka kale ka welweshaan xusuustaada
- Markaa adiga, qof qoyska ka tirsan, ama saaxiib lagu arko dhibaato ah hawlaha maalinlahaa ah sida bixinta biilasha, karinta cuntada, ama aadista balamaha

La hadal khabirka daryeelka ilowshaha ee deegaankaaga



Nagala soo xiriir:



Sawiro calaamadda
FindMyADRC.org



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES
P-03712BSO (03/2025)

Walaaca Xusuusta Sii Lumeysa?

(Concerns About Memory Loss?)

Waxa la sameynayo haddii adiga ama qof aad garaneyso la kulantaan jahawareerid ama xusuusta oo lunta

*Waxyaabaha fududeynaya dhaqaaqa,
waraaqaha oo u qoran si kale, iyo ballamaha
saacadaha aan la shaqeeyn waxaa la heli karaa
marka la soo codsado. Fursado ah dhageysi
ayaa lagu heli karaa xarunta; fadlan taleefan
noo soo dir si laguugu diyaariyo
turjubaan ama qoraalka
shaashadda.*



Tribal Memory Care Coordinator

Khabiirada Daryeelka Ilowshaha

Waa maxay khabiirka daryeelka ilowshaha?

Khabiirada daryeelka ilowshaha waxay hayaan tasiilaadyo loogu talagalay baarista xusuusta, waxbarasho, taageero ah dadka ilowshaha qaba, hagid iyo talabixin la siiyo dadka iyo qoysaska.

Taageero la siiyo qoysaska ay saameysay ilowshaha

Fursado ah in la isku qoro barnaamijyo iyo hawlaha caafimaadka ayaa diyaar idin ah adiga iyo daryeeleyaasha qoysakaaga.

Taageerada bulshada ee dadka qaba jahwareerka iyo luminta xusuusta waxa ka mid noqon kara kooxo ah taageero, hawlo bulsho, goobo ah xusuusta, iyo wax ka badan. Weydiiso shaqaalaha barnaamijyada laga heli karo deegaankaaga.

Madaxbanaani

Khabiirada daryeelka ilowshaa ayaa kugu caawin kara in ay kugu xiraan goobo bulsho oo kaa caawinaya inaad yeelato firfircooni oo aad hawlo ka qeyb gasho.

Halkee baa laga helayaa khabiirka daryeelka ilowshaha?

Waxaad adeegyada khabiirka daryeelka ilowshaha ka heli kartaa aging and disability resource center (xarunta tasiilaadka waayeelka iyo naafada ama ADRC) ama xafiiska Beelaha ee la shaqeeya.

Xafiisyada shaqada Beelaha iyo ADRCs waxaa laga helaa gobolkoo dhan oo waxay hayaan macluumaad, caawimaad, iyo siigudbin ah adeegyo kale.

Booqo FindMyADRC.org ama soo garaac 1-844-WIS-ADRC (1-844-947-2372).

Tasiilaadyada xusuusta

La xiriir ADRC ama xafiiska shaqada Beelaha si aad wax uga weydiiso helitaanka waxyaabaha soo socda oo ah fursado waxbarasho iyo caawimaad.

- Taageerada daryeelahaa qoyska
- Kooxaha taageerada
- Hawlaha bulshada
- Xarumaha xusuusta
- Meheradaha fahamsan ilowshaha
- Waxqabadka degdegta ah ee la xiriira ilowshaha